WAR BADAN OO KU AADDAN DIB U XALLINTA KHILAAFKA

Si aad u heshid nuqulka warqaddaan qoran oo ku qoran luqadaha mujtamaca iyo warka dheeraadka ee ku saabsan Adeegga Dib u Xallinta Khilaafka ee SEN-ta London, marka lagu daro qalabka fiidiyowga iyo tababarka , fadlan arag shabakaddeenna: www.londonsenmediation.org.uk

Nuqullada warqaddaan qoran waxaa kaloo lagu heli karaa sidii cajalado maqal ah, qoraalka farta indhooleyaasha ama xarfo waaweyn waxaana laga helayaa Adeegga Dib u Xallinta Khilaafka SEN-ta London.

SIDEED NOOLA SOO XIRIIREYSAA

Haddii aad jeclaan lahayd war dheeraad ah oo ku saabsan Adeegga Dib u Xallinta Khilaafka SEN-ta London, ama haddii aad jeceshahay inaad soo dirid sameysid, fadlan la xiriir:

Annette Colleary ama Jo Scherer-Thompson
Maauleyaasha Adeegga

Adeegga Dib u Xallinta Khilaafka SEN-ta London
240 Lancaster Road, London W11 4AH

Telefoon: 0800 389 0695 **Faakis:** 020 7243 8512
Email: acolleary@kids-online.org.uk or
jos@kids-online.org.uk

KIDS
working for children with special needs

SEN-TA LONDON

ADEEGGA DIB U XALLINTA KHILAAFKA

YAAN ANNAGU NAHAY?

Adeegga Dib u Xallinta Khilaafka SEN-ta London (LDRS) waa adeeg ujeeddadiisu tahay in lagu xalliyo muranka u dhexeeya waalidka iyo LEAs / iskuullada oo ku saabsan baahiyada waxbarasheed ee gaarka ah ee carruurta iyo sida ugu wanaagsan ee baahiyadaan loola kulmi karo. Adeegga waxaa maamula KIDS, hay'ad samafal oo madax bannaan taasoo leh in ka badan soddon sanadood oo khibrad ah ee la shaqeynta ilmaha baahiyada gaarka ah qaba iyo qoysaskooda.

MAXAAN KU DEEQNAA?

Adeeggeennu wuxuu ku saleysan yahay mabaadii'da dhex-dhexaadinta. Dhex-dhexaadintu waa mid aan toos ahayn, qaab rabitaan kaasoo khuseeya qayb seddexaad oo madax bannaan (dhex-dhexaadiyaha) caawinaya kuwa muranku u dhexeeyo iney ka wada hadlaan xalalka ay aqbali karaan qaybaha oo dhan. Dhex-dhexaadiyuhu waa mid aan eexan, dhinacna raacin, aanna ra'yigiisa soo hordhigeynin ama xal suuragal ah aan u soo bandhigeynin muranka. Dhex-dhexaadiyuhu wuxuu gacanta ku hayaa qaabka laakiin waxa ka soo baxaya dhex-dhexaadinta maya. Waa qaybaha naftooda kuwa xalka gaaraya/go'aansanaya waxa ka soo baxaya iyagoo u maraya ka qayb qaadashada qaabka dhex-dhexaadinta.

YEY YIHIIN DHEX-DHEXAADIYEYAASHU?

LDRS waxay leedahay guddi dhex-dhexaadiyeyaal oo madax bannaan, khibradna leh. Waxay dhammaantood tababar ku qaateen dhex-dhexaadinta iyo arrimaha sharciga iyho dhaqanka baahiyada waxbarasheed ee gaarka ah (SEN).

XAGGEE AYEY DHEX-DHEXAADINTU KA DHACAYSAA?

LEA ama iskuulka ku lugta leh khilaafka ayaa waxaa ka socdsan doona LDRS iney isku dubbaridaan goob u qalanta kulanka dhex dhexaadinta. Labo ama seddex qol ayaa loo baahan yahay si markaas dhex-dhexaadiyuhu uu u awoodo inuu la hadlo mid kastoo ka mid ah qaybaha hadba tii lagama maarmaan ah inta ay dhex-dhexaadintu socoto.

Waalidiintu waxay badanaa doonayaan in lagu kulmo xafiisyada LEA, laakiin waxaa jiri doona waqtiyo ay wanaagsanaan doonto in kulanka lagu qabto goob dhex-dhexaad ah. LEA ama iskuulka ku lugta leh laga codsato iney isku dubbaridaan waxyaabo la isku qaboojiyo ayna u cayimaan tas-hiilaad qado oo macquul ah.

MAXAA DHACAYA HADDII LA HESHIIYO?

Haddii dhex-dhexaadintu ay ku dhammaato heshiis laga gaaro dhammaan ama qaar ka mid ah arrimaha muranka dhex-dhexaadiyuhu wuxuu diyaarin doonaa dukumenti heshiis ka hor inta aan kulanka al xirin. Ereyada lagu qorayo waxaa lagala tashan doonaa qaybaha. Haddii uu qof kasta ku qanco heshiiska, qayb kasta waxaa la weydiinayaa iney saxiixdo heshiiska, ka dibna nuqul ayaa qayb kasta oo joogto la siin doonaa. Sidoo kale dhex-dhexaadiyuhu wuxuu nuqulka heshiiska u diri doonaa LDRS iyadoo loogu talogalay ujeeddooyin koontaroolid tayo.

KOONTAROOLIDDA TAYADA LDRS

Ka qaybgaleyaasha dhex-dhexaadinta waxaa la weydiisan doonaa iney buuxiyaan foomamka qiimeynta ka dibna ku soo celiyaan baqashad xiran una soo diraan LDRS. Qiimeynada isticmaalaha adeegga ayaa ah foomamaka ugu muhiimsan ee koontaroolidda tayada. Munaasabad, ay la jirto oggolaanshada qaybaha ku lugta leh, dhex-dhexaadiyeyaasha ayaa sidoo kale ah waxqabad ay qiimeyn doonaan Maamuleyaasha Adeegga LDRS.

YAA IMAANAYA DHEX-DHEXAADINTA?

Waalidka(diinta)/Daryeelaha(yeeleyaasha) waa iney yimaadaan dhex-dhexaadinta ayna awood u helaan xallinta muranka. Waalidka(lidiinta)/Daryeelaha(yeeleyaasha)waxaa lagu dhiirrigelinayaa iney keensadaan kulanka dhex-dhexaadinta taageere. Qofkaas wuxuu noqon karaa Sarkaalka Wadaagga Waalidiinta, saaxiib ama qaraabo.

Wakiilka LEA Waa muhiim in wakiilka LEA ee imaanaya dhex-dhexaadintu uu awood u haysto inuu wax xalliyo. Tan macnaheedu wuxuu yahay in sarkaalka matalaya LEA uu awood u leeyahay inuu heshiis ka galo arrimaha la keenay kulanka isagoon u dirin qof la shaqeeya oo ka sarreeya ama guddi.

Wakiilka Iskuulka Xaaladaha badankooda khilaafku wuxuu u dhexeeya waalidka (lidiinta)/daryeelaha(yeeleyaasha) iyo LEA, isla markaana waxay ku jirtaa awoodda LEA in la helo xal ama ay qaaddo tallaabo ku habboon. Arrimaha khuseeya SEN-ta badankoodu si kasta ha ahaatee, waa kuwa uu iskuulku doorka muhiimka ah ku leeyahay. Markaas waa muhiim in iskuullada, gaar ahaan Madaxda macallimiinta iyo SENCO, la casuumay si ay uga qayb qaataan xalka khilaafka meeshay ku habboon tahay.

Wakiillada iskuulladu waxay doorar kala geddisan ka qaataan kulannada dhex-dhexaadinta maadaama ay casuumi karaan waalidiinta ama LEA. Doorka wakiillada iskuulka waa la caddeyn doonaa dhex-dhexaadinta ka hor, isla markaana wakiilka iskuulku wuxuu awoodi doonaa inuu LDRS kala hadlo waxa laga filayo dhex-dhexaadinta iyo sida ugu wanaagsan ee loo diyaarinayo.

Ogow: maadaama dhex-dhexaadintu ay tahay qaab aan caadi ahayn, waxaa laga yaabaa ineysan keenin matalaad sharci ah.

GOORMAY DHEX-DHEXAADINTU UGU FIICAN TAHAY?

Marka la go'aansanayo iney tahay in laga qayb qaato dhex-dhexaadin, LEA ama iskuulka iyo waalidka(lidiinta)/ daryeelaha(yeeleyaashu) waa iney tixgelin siiyaan iney jirto dhur sugid heshiis oo ku aaddan wixii arrimo ah ee sababaya khilaafka. Waa muhiim in dhammaan qaybuhu ay dhex-dhexaadinta la yimaadaan rabitaan dhab ah ee iney xalliyaan khilaafka iyo doonista iney wada hadlaan.

SIDEE ISU DIRIDDA LOO SAMEEYAA?

Isu diridda loogu talogalay dhex-dhexaadintu wuxuu ka imaan karaa LEA, Iskuulka, Waalidka, ama Adeegga Wadaagga Waalidka. Marka ay tahay soo dirid waalid, si kasta ha ahaatee, waa muhiim in waalidiintu ay galaangal u lahaayeen talo iyo taageero ka hor inta aysan arrinka u keenin LDRS. Waxaa markaa la doorbidaa in soo diridda waalidku ay soo marto Adeegyada Wadaagga Waalidka. Haddii ay iskuul la tahay iney faa'iido leedahay in la qabto dhex-dhexaadin, wuxuu si toos ah ugu tegi karaa LDRS ama LEA si uu u helo tusaaleyn.

MIYEY KULANNADA DHEX-DHEXAADINTU YIHIIN KUWO QARSOODI AH?

Iney qaybuhu sida kale isla oggolaadaan mooyaane, waxa uu kulanka dhex-dhexaadintu ka kooban yahay waa qarsoodi waxaana la qabtaa horey u sii xukmin la'aan ku wajahan qaababka Maxkamadda SEN. Dukumentiyada dadweynaha loo bandhigayo ee ka soo baxaya kulanka dhex-dhexaadintu waa kuwa ay isla qaybuhu iskula oggolaadeen dhex-dhexaadinta. Waxa keliya ee ka reebban sharciga kore ee qarsoodidu waa meesha uu arrin la xiriira dhowridda ilmuhu ka soo baxo.

QAABKA ISU DIRIDDA

ISU DIRIDDU WAXAA LAGU SAMEYSAN KARAA TELEFOON, E-MAIL AMA WARQAD

Haddii isu soo diridda uu sameeyo sarkaalka LEA, sarkaalka Wadaagga Waalidku ama iskuulku, xaqiijin ayaa la raadin doonaa si loo xaqiijiyo in dhammaan qaybuhu ay oggolaadeen iney ka qayb qaataan dhex-dhexaadinta

Haddiise isu soo diridda uu waalid sameeyo, warqad heer ah ayaa loo dirayaa LEA taasoo ku casumeysa ka qayb qaadashada dhex-dhexaadinta.

Haddii ay dhacdo inuu LEA ka gaabsaado ka qayb galka adeeggu wuxuu waalidka u sheegi doonaa ineysan dhex-dhexaadintu dhici karin.

Haddii qaybaha oo dhan ay doonayaan iney ka qayb qaataan dhex-dhexaadinta.

Adeegga Dib u Xallinta Khilaafka SEN-ta London wuxuu hubinayaa in kuwa imaanaya ay haystaan awood ay ku xalliyaan muranka isla markaana faah faahita aragtida ay qolo walba ka qabta khilaafka ayaa qorayaa. Haddii labada qaybood midkoodna uusan haysan awood ku filan oo ay wax ku xalliso LDRS waxaa laga yaabaa ineysan ku deeqin dhex-dhexaadin.

LDRS waxay diyaarineysaa dukumenti loogu talogalay qayb kasta kaasoo sheegaya waxa ay ku tilmaameen iney yihiin waxa ugu weyn ee khilaafka keenay

LDRS waxay kuwaan u direysaa qayb kasta si loo xaqiijiyo sax ahaanteeda. Qayb kasta waxaa la weydiin doonaa iney saxiixdo nuqul ka dibna ku soo celiso baqshadda xiran ee la siiyey. Marka xaqiijinta la helo, nuqullada dukumentiga ayaa loo kala dirayaa qaybaha ka qayb galaya

LEA-da ayaa waxaa la weydiinayaa iney isku dubbariddo goob caqligal ah waxayna LDRS ku wargelin doontaa faah faahinnada, goobta iyo jihooyinka safarka. Warkaan waxaa loo diray dhammaan qaybaha, iyadoo ay la jirto magaca iyo faah faahin kooban oo ku saabsan dhex-dhexaadiyaha.

Dhex-dhexaadintu waxay dhacaysaa

Haddii heshiis la gaaro, taas waa la qorayaa isla markaana nuqul ayaa la siinayaa qayb kasta. Dhex-dhexaadiyhu wuxuu LDRS u dirayaa nuqullo dheeraad ah.

Iyadoo qayb ka ah koontaroolidda tayada, ka qaybgaleyaasha waxaa sidoo kale la weydiinayaa iney buuxiyaan foomamka qiimeynta kuna soo celiyaan baqshad xiran una soo diraan LDRS